



Oregon

Kate Brown, Governor

Waaxda Adeegyada Aadanaha
Waayelada iyo Dadka qabo Naafanimada
500 Summer St. NE
Salem, OR 97301
1-800-241-3013

Janaayo 24, 2022

Macmiilka-Shaqa bixiyaha
Qaali ah:



Sanadkii la soo dhaafay oo dhan, waxaan adiga kula soo wadaagnay macluumaadka ku saabsan xeerka Golaha Guurtida ee 1534 iyo tababarka loo baahan yahay ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga. Ujeedada warqadan waa in lagu ogeysiyo waqtiga ugu dambeeya ee tababarka muhiimka ah ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga ee aad shaqaaleysiiso, iyo in lagu bixiyo jawaabaha su'aalaha badanaa la isweydiiyo. Shaqaalaha daryeelka guriga ayaa sidoo kale boostada ku helaya warqad xusuusin ah.

Sharci ahaan, dhammaan shaqaalaha daryeelka guriga waa inay dhammaystiraan tababarka loo baahan yahay ee dib u cusboonaysiinta. Wakhtiga kama dambaysta ah ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga inay ku dhamaystirayaan tani waa **Maarso 31, 2022**. Fadlan xasuusi shaqaalahaaga wakhtiga kama dambaysta ah ee muhiimka ah. Shaqaalaha daryeelka guriga ee aan dhamaysanin tababarka loo baahan yahay meesha lagu gaaro waqtiga kama dambaysta ah awood uma yeelan doonaan inay u shaqeeyaan macmiilka-shaqa bixiyaha. Waxaad u baahan doontaa inaad shaqaaleysiiso shaqaale cusub haddii shaqaalahaaga gabi ahaanba uusan ku sii shaqayn karin sababtoo ah ma aysan dhammaysan tababarka. La-taliye ka tirsan barnaamijka Isku xirka Agabyada Shaqa bixiyaha (ERC) ee ay bixiso Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon waxaa uu kaala shaqeyn karaa inaad shaqaaleysiiso shaqaale cusub. Si aad u hesho gudbin, fadlan la xiriiir maareeyaha kiiskaaga ama wac 1-877-867-0077 oona dhageyso xulashada Isku xirka Agabyada Shaqa bixiyaha.

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tababarka loo baahan yahay, fadlan akhri dukumentiyada ku lifaaqan.

Waxa sidoo kale aad dhageysan kartaa Maqaladda Xiriirinta OHCC ee laga helo mareegto Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ee barta. <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/HCC/Pages/Senate-Bill-1534-Updates.aspx>.

Daacadnimo,

Xafiiska Waayelada iyo dadka Naafada ah
Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon

“Badbaado, caafimaad iyo madaxbannaani dhammaan dadka Oregon”
Loo-shaqeeye Fursaddiisa Loo Siman Yahay